

F A A F I N



R A S M I A H

EE JAMHUR1AYADDA DIMUQRAD1CA SOMALIYA

Sannadka 4aad

Muqdishio, 10 Maarso 1976

JL 3 BIS

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Somahya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F.R. halkji sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydjistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ab — Lacagta. waxaa lagu bixinayaa Xaflska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

KOOBNIIN

S O G G A K O W A A D

S H A R C I

W. M.

SOGGA LABAAD

XEER MADAXWEYNAHA GOLAH SARE EE KACAAN-

KA. L. 28 Bis, 21.2.1976 — *Dhaqan gelin Xeer* Bogga 150/Bis

B O G G A S E D D A X A D

TALOOYFN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

W. M.

Wakaaladda Madbacadda Qaranka — Muqdisho

Qodobka 5aad

Shaqaalaha Joogtada ah ee Dawladda Hoose ee Xamar waxay ka koobnaan doonaan shaqaale ay Dawladda Hoose toos u qoratay iyo shaqaale Dawladda Dhexe ka yimid oo si dulsaar ah loogu soo beddelay.

Qodobka 6aad

Shaqaalaha sida tooska ah ay Dawladda Hoose u qoratay waxay noqon karaan kuwa joogta ah ama kuwa ku meel gaar ah. Shaqaalaha Joogtada ah waxaa lagu maamuli doonaa sida Xeerkaani qoraayo. Shaqaalaha ku meel gaarka ahse waxay ka kooban yihiin shaqaale loo qoray shaqooyin gaar ah oo socon doona muddo go'an waxaana lagu maamuli doonaa sharuudaha ku taal qandaraasyada ay la dhitaan Dawladda Hoose amase sharciga shaqada ee dalka.

Qodobka 7aad

Shaqaalaha sida dulsarka ah looga soo beddelay Dawladda Dhexe waxaa lagu maamuli doonaa sharciga shaqaalaha Dawladda DTiexe lambarkiisuna yahay 29 ee Idii Abriile 1970kii.

Qodobka 8aad

Mee lay n:

Isu-geynta guud ahaaneed ee.jagooyinka ay leedahay Dawladda Hoose ee Xamar lacagtuna miisaaniyaddeeda ugu jirto, ayey ka koobnaan doontaa meelayouteedu (Establishment), ee halkaan ku lifaaqan.

Qodobka 9aad

Waa in loo yeelaa jaga kasta darajo, waajibaad iyo xil intaba, kuwaasoo astaantooda guud ahaaneed uu tilmaami doono qodobka ka hadlaya qaybaha iyo darajooyinka.

Qodobka 10aad

Qaabka dhismaha shaqaaluuhu wuxuu ka koobnaan doonaa 4ta qaybood oo soo socota:

Qaybta «A» Maamul iyo Xirfad.

- » «B» Fulin iyo Farsamayaqaannimo Sare.
- » «T» Karaaninimo iyo Farsamayaqaannimo.
- » «J» Shaqaale Hoose iyo Kaaliye Farsamayaqaan.

Qodobka 11aad

Mid kasta oo qaybahaas kor ku xusan ka mid ah wuxuu ka koobnaan doonaa darajooyin wuxuuna yeelan doonaa mushaarka ku dhigan jarjanjarada (Tabeellaha) «A» ee halkaan ku lifaaqan.

S H A Q A Q O R I D

Qodobka 12aad

Ku wareejinta shaqaalaha Qaybaha cusub:

1. Marka Xeerkaani dhaqan galoo dadka ka shaqeeyaa Dawladda Hoose ee Xamar waxaa la kala gelinayaa qaybaha iyo darajooyinka ay xusayaan qodobbada lambarkoodu yahay 8, 9 iyo 10.
2. Marka arrintaa la fulinaayo, Dawladda Hoose waxay sii dayn kartaa shaqaalaha siyaadada ah oo aan loo baahnayn, amase waxay dadkaas gelin kartaa - wax kastaba ha dhigee qodobka lambarkiisu yahay 31, xarafka (x) - meelo, qaybo, darajooyin, jagooyin iyo waajibaad ka duwan kuway horay u hayeen ama u qaban jireen, shaadooyinka aqoonta oo ay haystaan waxay doonto ha noqotee.
3. Tillaabadaas ayada ah qaadiddeedu waa inay ku soo baxdaa Xeer uu saxiixo Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanku oo dhageystay tala jeedinta Duqa magaalada kaddib markii Duqa magaaladu maqlay ra'yiga Guddiga shaqa-qoridda iyo dallacaadda.

H A B K A S H A Q A Q O R I D D A
Qodobka 15aad

- a) Qaybaha iyo darajooyinka kala duwani markay bannaanaadaan waa in loo buuxshaa sida soo socota:
 - (i) shaqo-qorid bilaw ah amase
 - (ii) beddelaad qofka shaqaalaha ah laga soo beddello Dawladda Dhexe amase
 - (iii) Dawladaha Hoose ee Gobollada iyo Degmooyinka kale, amase
 - (iv) dallacaad ku timid istaahiliid iyo shaqo-ku-raagid.
- b) Ugu yaraan boqolkiiba soddon (30%) jagooyinka A, B iyo T waa in lagu buuxshaa shaqa-qorid toos ah inta soo hadhayna dallacaad.
- t) Markii jago bannaanaato ama ay ku dhowas,to inay ka bannaanaato qayb ama darajo ka mid ah qaabka dhismaha shaqada, Guddiga shaqa-qoriddu waa inuu guddoomiyaa habka ay tihnaamayaan xarfaha qodo'oka **13aad** ku **Tcusan oo jagadaas maran** lagu buuxin doono.

Qodobka 14aad

Shuruudaha laga rabo dadka shaqada loo qoraayo:

- a) *Jinsiyad:* waa inaan shaqada loo qorin qof aan hay&an jinsiyadda Soomaaliyeed.
- b) *Da'da:* shaqada looma qori karo qof da'diisu ka yar tahay 16 sano. Qofka shaqada doonayaa waa inuu keenaa warqadda dhalashada ee filkii&a cadiaynaysa.

- t) *Aadaabta*: qofna looma qori karo qayb ama darajo ka mid ah shaqada Dawladda Hoose hadduusan warqad caddaynaysa aadaabtiisa Booliska ka keenin.
- j) *Caafimaad*: shaqada looma qori karo qof aan keenin xog-warran takhtareed oo caddaynaaya in caafimaadkiisu jir iyo maskaxba fii-can yahay oo uu shaqada qaban karo.
- x) *Shahaadada tacliinta*: shaqada looma qori karo qof aan haysan shahaadooyinka tacliinta oo ay jaga kasta u baahan tahay sida **uu** uu tilmaamayo qodobka 18aad xarafka (t).
- h) Wixii warqada ama dokuminti kale ah oo loo baahdo, caddaynaya in qofkaasi u qalmo jagada la rabo inuu buuxsho.

Qodobka 15aad

Duqa magaaladu wuxuu asaasi doonaa guddi lagu magacaabo gudiga shaqa-qcriidda iyo dallacaadda, oo xilkiisu yahay shaqa-qoridda iyo allacaadda shaqaalaha. Guddigaasi wuxuu kaloo mas'uul ka noqona-aa tababarka iyo horumarinta shaqaalaha.

Qodobka 16aad

Guddigaasi wuxuu ka koobnaan doonaa qof guddoomiye ah oo dajadiisu aysan ka yarayn ku-xigeen Duq iyo 4 Xubnoood oo aysan daraadocdu ka yarayn Agaasime.

Qodobka 17aad

Shaqada joogtada ah ee Dawladda Hoose looma qori karo qof aart :u soo gelin tartan imtixaan ahaaneed oo dadkoo dhan u furan, marka rrintaa laga reebo waxyaabaha uu qorayo sharciga lambarkiisu yahay 18 ee 10Kii Disember 1974.

Qodobka 18aad

- .j) habka loo dajinaayo tartanka imtixaan ahaaneed waa inuu noqdaa mid waafaqsan sharciga Dawladda.
- i) Duqa magaaladu, kaddib markuu hubsado hagaagsanaanta imtixaanka lagu qaaday sida waafaqsan sharciga iyo xeerkaanba, ayuu. wuxuu sugayaa sida imtixaanka loogu kala hcrreeyo wuxuuna shaa-ka ka qaadaya ciddii tartankaas ku guuleysatey.
-) Qof kasta oo la doonayo in lagu magacaabo jago ka mid ah jagoo-yinka Dawladda Hoose waa inuu haystaa shahaadooyinka waxbarashada ee soo socda: Shahaadada Jaamicadda ama wax u dhigma kuwa loo qoraayo qayhta «A»; ugu yaraan shahaadada Dugsiga Sa-re ama wax u dhigma kuwa loo qoraayo Qaypta «B»; ugu yaraan shahaadada Dugsiga Dhexe ama wax u dhxgma kuwa loo qoraayo Qaypta «C».

Hase yeeshie:

Dadka leh waayo-aragnimo ku filan oo sanado lagu qiyasi karo isla markaas haysta shahaadooyinkii layska rabay **ti** ugu hoosey-sey, amase dadka haysta shahaadooyin ka sarreya kuwii looga baahnaa qayb qaybahaa ka mid ah, laakiinse aan gaari karin qaybta kaloo ayada ka sarreysa, dadkaas ayaga ah waa in la geeyaa darajo qaybta hore ka mid ah oo ka sarreysa darajada haddii kale ay tagi lahaayeen.

Qof kasta oo farsama yaqaan ah waxaa lagu qori karaa 'jago teknika ah oo ka tirsan qaybaha **t>** iyo C inkastoo uusan haysan shahaadooyinka waxbarashada ee layska doonaayo haddii ay guddiga la tahay in awooddiisa xagga farsama-yaqaannimada iyo xirfaddu ay ka dhigayaan mid u qalma inuu xuuxsho jsgada ayada ah.

Qodobka 19aad

Shaqa qorid:

Ayadoo k tixgelinaayo waxyaabaha sharcigu qoraayo, habka shaqada Dawladda Hoose loogu qoraayo waxaa loo dhammeystiraya sidaan soo socota:

- a) Magacaabidda shaqaalaha darajadoodu tahay A iyo B waa may ku soo baxdaa xeer (dekereeto) uu saxiixo Madaxweynaha G.S.K., asagoo dhagaystey tala jeedinta Duqa magaalada oo asaguna maqlay ra'yiga Guddiga shaqo-qoridda iyo dallacaadda.
- b) Magacaabid shaqaalaha qaybaha C iyo D waa: inay ku soo .baxdaa xeer uu saxiixo Duqa magaalada ka dib markii uu dhagaystey tala jeedinta Guddigaas asaga ah.

Qodobka 20aad

Dhaar iyo ballan-qaad:

Qofka shaqaalaha ah, markuu shaqada ku soo biiro, waa in uu dhaarta soo socota ku maraa Duqa magaalada hortiisa ama qof asaga ka wakiil ah; «Waxaan ku dhaaranaya, magaca Ilaahay inaan u ahaado dar-allaa iyo daacad qawaaniinta iyo xeerkarka Jamhuuriyadda Dimo-qraadiga Soomaaliya iyo Nidaamka Dawladda Hoose ee Xamar. Inaan u guto xilka laygu aamminay habka loo doonaayo oo ugu habboon, anigoo aan waxba kala harayn awooddayda iyo dadaalkaygaba. Inaan ilaa-liyo sirta Dawladda Soomaaliyeed oo dhan oo aan ka dhawro waxaan qabanaayoo idil: Eex, Xigto, Saaxiibtinimo iyo Waji aqoon. Inaan u dhaqmo si adkaynaysa sharafta, nabadgelyada, midnimada iyo horukaca ummadda Soomaaliyeed. Intaas **oo** dhan ayaa igu wallaahi ah oo igu billaahi ah oo igu tallaahi ah».

Qodofcka 26aad

Kororsiimada caadiga ah:

Kororsiimada caadiga ah ee mushaarku waa kororsiimo sanadkiiba mar qofka shaqaalaha ah la siin karo, inkastoo taasi ku xiran tahay beddelaadda la beddello sharciga lambarkisu yahay 26 ee 28.9.70. Kororsiimadaasi waa wax hal tillaabo ka sarreeya mushaarkii markii hore **qofku** ku qaadanaayey darajada jagadiisa.

- f. Ayadoo ku xiran waxyaabaha ku qoran qodobbada 47 iyo 48, iyo ayadoo aysan ku jirin mararka shuruudaha shaqo-qoriddu ay wax kale qabaan, Duqa magaalada ama sarkaalka laanta madaxa u ah waxay siin karaan qofka shaqaalaha ah kororsiimo caadi ah marka waqtigeeda la gaaro. Hase yeeshi qofna lama siin karo kororsiimo caadi ah oo **ka** badan wixa u degsan heerka **u** sarreeya ee darajada jagadiisa.
- >. Duqa magaalada ama sarkaalka laanta madaxda ka ah waxay ka joojinayaan kororsiimada caadiga ah qofkii shaqaale ah oo shaqadiisa la dhaliloo ama kii laga qaado tillaabo habsami ama dishibiliin **ah oo ka** heer sarreysa canaan qoran.

Qodobka 27aad

Oaaweyn bilaash ah:

Qofka shaqaalaha ah wuxuu xaq u leeyahay daaweyn lacag la'aan ih oo lagu daaweyyo Isbitaallada Dawladda.

Qodobka 28aad

Gunnada xilka iyo Guriga:

Duqa magaalada, Ki-xigeermada Duqa magaalada iyo Agaasimayaaya-ihia waaxyuhu waxay xaq u yeelanayaan gunnooyinka xilka iyo guriga EC ku cad lifaaqa «B» ee xeerkaan la socda.

Gunnooyinkaas la soo sheegay waxaa dadkaas ayaga ah la siin iaraa oo kaliya markay gacanta kula jiraan oo ay wadaan shaqooyinkii •asmiga ahaa oo gunnooyinkaas lagu siinaayey. Hase yeeshi shardigaan iambe saraakiishaas la soo sheegay lagu qaadi maayo marka ay ku iraan fasaxoodii caadiga ahaa oo sannadka ama ay **ku** maqan yihiin shaqa rasmi ah oo ku meel gaar ah, kuna soo baxday xeer uu saxiixay Mtadaxweynaha GSK.

Qodobka 29aad

Gunnooyinka jaamiciyiina iyo dadka xirfadaha yagaan:

Gunnooyinka xirfadda iyo guriga ee jaamiciinta iyo dadka kaloo laysta shahaadooyin xirfadeed ama farsama-yaqaannimo kana hawl haya D. Hoose **ce** Muqdisho, **waxaa lagu** bixin doonaa sharciga L. 8 ee

8.1975kii, oo lagu toosiyey sharciga L. 31 ee 30.3.1972kii, iyo **wareeg-** tada lambarkeedu yahay XGX/1.5.76 ee 4.1.76.

Qodobka 30aad

Sahayda Safarka iyo Gunnada habeyn dhaxa:

1. Qofka shaqaalaha ah ee waddanka dibeddiisa shaqa ay Dawladda Hoose ee Muqdisho leedahay loogu diro wuxuu xaq u -yeelanayaa sahayda Safarka ee ka muuqata lifaaqa «C» ee xeerkaan la socota.
2. Marka la beddolo makhaasiirta Safarka oo dhan ee qofka shaqaalaha ah iyo dadka qoyskiisa ka tirsan waxaa bixinaaya Dawladda Hoose ee Xamar.
3. Qofka shaqaalaha ah oo la beddelay ama waddanka gudihiisa meel ka mid ah shaqo loogu diray wuxuu xaq u yeelanayaa gunno ha-been dhax, inta uu safarka ku jiro, taasoo ah sida ku qoran lifaaqa «D» ee halkaan ku dheggan.

Qodobka 31aad

Dallacaad, dulsaar iyo beddel:

- a) Dallacaadda shaqaalaha joogtada ah loo dallaciinaayo qayb iyo darajo ka sarreysa tii hore waxaa la samayn karaa ayadoo la raa-cayo shuruudaha soo socda:
 - (i) Kala horrayn xaggaa shaqa ku raagidda; amase
 - (ii) Tartan imtixaan ahaaneed; amase
 - (iii) Istaahilid gaar ahaaneed, taasoo lagama maarmaan ay tahay in qoraal lagu caddeeyo.
- b) Dallacaad Iooma samayn karo qofna haddaan jago u bannaani jirin. Qofka shaqaalaha ah oo dallacaadda loo doonaayo waa inuu ahaado mid ku jirey ugu yaraan 3 sano, darajada uu markaa joogo ee qaybta uu ka tirsan yahay.
- t) Shahaadooyinka tacliinta, waaya-aragnimada xirfadeed iyo aqoon-ta baraatiikada ah ee shaqadu waxa weeye saldhigga lagama maarmaanka u ah u-qalmidda qofka shaqaalaha ahi u qalmo dallacaadda. Haddii dadka qaarkood ay ka sinmaan xaggaa isaahilidda iyo shahaadooyinka yaxaa lagu kala saarayaa siday shaqa ku raagiddu ugu kala hotreeyaan.
- j) Haddii qof shaqaale ah oo ka tirsan qaybta A iyo B si **wanaagsan** uga soo baxo hawlaha jago darajadeedu tiisii hore ka sarreysa oo uu si fiican u socodsiiyo muddo aan ka yarayn hal sano, arrintaasi waxay noqon kartaa shardi dheeraad ah oo dallacaadda loogu tiwgeliyo.
- x) Dallacaad keeneysa in qof shaqaale ah uu qayb ka guuro oo qayt) kaloo ka sarreysa tago laguma samayn karo waxaan ahayn imtixaan Dawladda Hoose ee Muqdisho.

f * tixaan D. Hoose ee Muqdisho dhexdeeda lagu qabto araase shaada waxbarasho. Isla markaa waxaa sharci u ah in qofkaas a&aga ah uu ka soo shaqeeyey jagadaas hoose muddo aan ka yarayn 3 sano.

kh) ' Haddii qofka shaqaalaha ah uu muujiyo i&taahilid dheeraad ah ama hanuunsanaan kacaannimo, Duqa magaaladu wuxuu tusaa-layn karaa in dallacaad loo tixgeliyo.

'
d) . Dallacaadda shaqaalaha loo dallacsinaayo jagooyin ka mid ah qaybaha A iyo B waa inay ku soo baxdo xeer uu soo saxiyo Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka, asagoo dhageysey tala-jeedinta Duqa magaalada oo isaguna maqlay Guddiga Dallacaadda iyo shaqo-qoridda.

r) .Dallacaadda ku saabsan jagooyin ka mid ah qaybaha C iyo D waa may ku soo baxaan dekereeto uu saxiixay Duqa magaaladu ka dib markuu dhageystey tala-jeedinta Guddiga Dallacaadda.

Qodobka 32aad

Gunno ku-meel guar:

Duqa magaaladu, asagoo la tashaday Guddiga wuxuu awoodi karaa fnarkastoo ay lagama maarmaan noqoto inuu u xilsaaro qofka ugu darajo sarreya inuu si ku meel gaar ah u' socodsiyo hawlaha jago tiisa ka sareysa. Muddada ira xilkaas hayo wuxuu qaadan doonaa, mushaar-ka darajadiisa ka sokow, gunno ku-meel gaar haddii darajada hawlahaasi ay gunno leedahay.

Marka muddada shaqadaas ku meel gaarka ahi dhammaato qofka-su wuxuu ku laaban doonaa darajadiisi hore, ayadoo shaqa ku raagidiisix ayan 'waxba ku kordhinayn siihaynta jagadaas sare uu sii hayo. Gunno ku meel gaar lama bixin karo haddii qofkii hore oo xaga u lahaa uu shaqo rasmi ah ku maqan yahay ama fasaxiisii sannadka ee caadiga ahaa ku jiro. Gunno ku meel gaar 2ba qof isku mar looma wada siin karo jago Hal xafis oo qura.

Qodobka 33aad

BeddeJaad iyo dulsaar:

1. Duqa magaaladu wuxuu go'aamin doonaa hawl qabadka shaqa-a- "laha D. 'Hoose ee Muqdisho ay ka hawl qabanayaan xubnaheeda kala duwan wuxuuna samayn doonaa beddelaadda iyo shaqooyinka ' kumeel gaarka ah oo hadba markii muddo la joogo socodsiinta shaqadu u baahnaan dooto in shaqaalaha lagu dhex sameeyo.
2. Beddelaadda iyo dulsaarka shaqaalaha ka tirsan qaybaha A iyo B loogu wareejinaayo heyadaha kale ee Dawladda waa in lagu dhammee-ya Dekereeto uu saxiixo Madaxweynaha GSK, asagoo la tashanaaya Duqa magaalada.

3. Ku-xigeennada Duqa magaaladu way isku beddel karaan shaqaalaha ka tirsan Waaxyaha ayaga hoo& yimaada, laakiinse beddelaadda shaqaalaha ka tirsan qaybo kala duwan waxay u baahan tahay oggolaanshaha Duqa magaalada, i&agoo dhegeystay tala-jeedinta ku-xigaha Duqa magaalada ee qaabbilsan arrimaha shaqaalaha, kaasoo asaguna la tashanaaya ku-xigeenka ama ku-xigeennada kaloo arrintu khusayso.

QAYBTA III

FASAXYADA

Qodobka 34aad

Fasax caadi ah:

- a) Qof kastoo shaqaalaha joogtada ah ka mid ahi wuxuu xaq u lee-yahay sannadkiiba fasax soddon beri ah oo mushaar la siinayo, kaas oo sida caadada ah ay tahay in uu qaato sannadka shaqada dhammaadiisa. Fasaxaas isaga ah lama uimurin karo.
- b) Haddii socodsiinta shaqadu u baahnaato, fasaxa &annadka waxaa loo qaybin karaa muddooyin gaagaaban, ama waa la joojin karaa ama la kala goyn karaa.
- t) Ku-xigaha Duqa magaalada ee qaabbilsan shaqaalaha ayaa siinaya shaqaalaha joogtada ah fasaxooda markuu u bislaado, kaddib markuu belo oggolaanshaha ku-xigaha Duqa ee ay raacsan yihiin, hase yeeshi fasaxa ku-xigeennada Duqa iyo Agaasimayaasha waa in loo helaa oggolaanshaha Duqa magaalada.

Qodobka 35aad

Fasax aan caadi ahayn:

Fasaxa sannad walba ah ka sokow, qofka shaqaalaha ah wuxuu siin karaa iyadoo hadba ku xiran baahida shaqadu siday tahay, ku-xigeenka Duqa magaalada ee qaabbilsan arrimaha shaqaaluhu fasax aan caadi ahayn oo lacag la'an ah, muddo aan ka badnayan 4 (afar) bilood, sad-dexdii sanaba mar. Hase yeeshi, haddii la rabo fa&caxaas in la siiyo shaqaalaha qaybaha «A» iyo «B» waa in la helaa oggolaanshaha Duqa magaalada.

Qodobka 36aad

Fasax Dhalliin:

- a) Fasaxa ku xusan qodobka 34 ka sokow, qofka dumarka ah oo shaqaalaha ah waxay xaq u leedahay fasax dhalliin oo lacag la qaadnayo, muddadisuna tahay 4 (afar) bilood. Hase ahaatee, arjiga fasaxaas lagu dalbanayo waa in loo soo qortaa Ku-xigaha Duqa ee qaabbilsan arrimaha shaqaalaha, isagoo ay ku lifaaqan tahay warqad uu soo saxiixay Dhakhtar dawladeed, waana in ugu yaraan laba bilood oo fasaxaas ah la qaataa Umusha kabaci.

Qodobka 37aad

Fasax jirro:

- a) Qofka shaqaalaha ah ce ka tirsan Dawladda Hoose ee Muqdisho, waxaa la sim karaa fasax jirro oo aan ka badnayn 12 (laba iyo tobant) bilood mudda kastoo saddex sano ah dhexdeed. Arjiga cod-sashada fasaxa jirrada waa in loo 500 qortaa Ku-xigaha Duqa ma-gaalada ee shaqaalaha qaabbilsan, iyadoo la soo marsiinaayo madaxa Waaxda, ayna ku lifaaqan tahay warqad caafimaad 00 uu soo qoray Takhtar dawladeed.
- b) Fasaxa jirrada inta uu ku jiro qofka shaqaalaha ah waxaa la sii-nayaa mushaar buuxa saddexda bilood ce hore, bilaha harayna nus mushaar. Hase yeeshi, haddii xanuunka ay u sabab tahay jirro ama dhaawac shaqadu keentay, qofka shaqaalaha ahi wuxuu mudan yahay mushuur buuxa mudda uu buko 00 idil.
- t) Qofka shaqaalaha ah lama siin karo fasax jirro 00 ku yimid bukid gaaban muddo ka badan tobant maalmood, hal sano gudaheed. Hase ahaatee, wixii muddadaas ka badan 00 fasaxa caynkaas ah ku lug leh waxaa laga jarayaas fasaxa caadiga ah ee qofka.

Qodobka 38aad

Fasax wax-barasho:

- a) Duqa magaaladu, isagoo dhageystey tala jeedinta Ku-xigaha Duqa magaalada ee arrintu khusayso, wuxuu fasax waxbarasho siin karaa qofka shaqaalaha ah 00 deeq tacliineed ama ruqso loo siiyey inuu ka qayb galoo tababar ku lug leh shaqadiisa, muddo aan ka badnayn 24 (afar iyo labaatan) bilood ama oggolaansho loo siiyey inuu goobjoog u ahaado Seminaar ama aqoon-is-weydaarsi la xiriira shaqadiisa 00 aan muddadiisu ka badnayn 3 (saddex) bilood.
- b) Inta ay socoto muddada deeqda tacliineed ama aqoon-is-weydaarsi ama tababarka dibedda, qofka shaqaalaha ahi xaq uma uu la-ha mushaaro, laakiinse xaaskiisa waxaa la siin karaa gunnada soo . socota:
 1. Mashaar buuxa haddii muddada seminaarku aysan ka badnayn 3 (saddex) bilood.
 2. Haddaan muddada deeqda-tacliineed ama tababarku ka badnayn 24 (afar iyo labaatan) bilood, qofka shaqaalaha ah waxaa la yeeli karaa sida soo socota:
 - i) Haddii mashaarka qofku yahay Sh. So. 600,00 ama ka ba-dan bishiiba, gunnadu waxay noqonaysaa mashaarka nus-kiis.

- ii) Haddii mashaarka qofku ka yar yahay Sh. So. 600,00, bi-shiiba, waxay gunnadu noqonaysaa saddex (3) meelood laba (2/3), iyadoo heerkeeda ugu sarreeya 00 aan la dhaafi karini yahay Sh. So. 300.00.
- iii) Ereyga xaaska qodobka 38 (b) ee kor ku xusan ulajeedda-diisa marka laga hadlayo, waxaa ku jira, afada iyo car-ruurta aan qaan gaarka ahayn ka sokow, labada waalid, walaalaha wiilasha ah 00 aan qaan gaarin iyo gabdhaha walaalaha ah 00 aan weli la guursan.

Qodobka 39aad

Ka-soo-celin fasax:

Isagoo tixgelinaaya baahida socodiinta shaqada, Duqa magaaladu wuxuu shaqada, ka soo celin karaa qof shaqaale ah fasaxii uu ku qaatay siday qorayaan qodobbada 34 (a) iyo (b) 34, qofka shaqaalaha ahina waa inuu shaqada yimaadaa waqtigii la cayimay, haddaysan jinn asbaab aad u cuius 00 taas u suuro gelin weyda.

DARYEELJDDA BULSHON1MO EE SHAQAALA.HA

Qodobka 40aad

Badbaadin khasab ah:

Dawladda Hoose ee Muqdisho waxay gelin doontaa dhammaan shaqaalaha farsamada gacanta ka shaqeeya ama teknikada ah iyo kuwa ka hawl qabta shaqooyinka keena cudurrada faafa badbaadinta khasabka ee shilalka sancada ee ay samayo Wakaaladda Badbaadinta shaqaalaha Soomaaliyeed (CASS).

Shaqaalaha aan badbaadada ku jirin hadday jirro ama dhaawac shaqada ku gaaro ayna sugnaato inay shaqada laxiriirto waxaa qofka loo aqoansanayaa inay tahay wax shaqada kaga yimdi.

Qodobka 41aad

Hawl-gab iyo Liiltir: (Pension & Graduity):

Waxyabaha uu qorayo sharciga lambarkiisu yahay 5 ee 31.12.1969 (Hawl-gabka iyo Liiltirka shaqaalaha Dawladda Dhewe) waxaa lagu dhaqi doonaa shaqaalaha Dawladda Hoose ee Muqdisho, iyadoo toosintaan soo socota lagu sameeyey:

- al Lacagaha la bixinaayo ee ku kala yaal xarafka 3aad ee qodobka 4aad iyo kan 3aad ee qodobka 7aad ee sharciga la soo sheegay waxaa la dhiibi doonaa laga bilaabo Ida Jannaayo 1976ka,

- b) Xacagaha la bixinaayo ee lagu xusay xarafka 4aad ee qod. 4aad iyo xarafka 4aad ee qod. 7aad ee sharciga la soo sheegay waxaa bixinaysa Dawladda Hoose ee Muqdisho, meeshay ka bixin lahayd Dawladda Dhexe.

Qodobka 42aad

A ma ah in:

Qofka shaqaalaha ahi wiixuu heli karaa amaahin gaar ah, isagoo ama deyn ka qaadanaya Dawladda Hoose ee Muqdisho aina bankiyada Dawladda isagoo ay taas gacau ku siinay&o Dawladda Hoose ee Muqdisho, kuwaasoo ku dhisaalaysan Xeerarka gaarka ah oo Dawladda Hoose ee Muqdisho arrimahaas ka soo saari doonto,

QAYBTA IV

ASWUBTA SHAQAALAH

Xilka' iyo waajibaadka shaqaalaha:

Qodobka 43aad

Xilka:

1. Qof kastoo ka tirsan Dawladda Hoose ee Muqdisho waa inuu u gutaa waajibaadka Xafiiska, isagoo raacaya awaamirta la siinayo ee la xiriira shaqadiisa. Inta uu shaqada hayana waa inuu muujiyaa ashmb wanaagsan, sharaf iyo akhlaaq.
2. Qofka shaqaalaha ah waxaa laga rabaa waajibaadka soo socda:
 - a) Waa inuu yeeshaa asluub wanaagsan;
 - b) Waa inuu raacaa qodobbada Xeerkaan ku qoran;
 - t) Waa inuu ixtiraamaa madaxdiisa, si wacanna ula dhaqmaa dadweynaha, Jaallayaasha ay wada shaqeeyaan iyo dadka ka hooseeya intaba;
 - j) Waa inuu si buuxda u qariyaa wixii xogwarran rasmi ah oo uu og yahay;
 - x) Waa inuu si dhaqso ah ula socodsiyaa raadaxdiisa tillaaboo kastoo sharci darro ah oo laga yaabo inuu ogaado intuu xilkiiisa fulinaayo;
 - kh) Waa inuu si xilkasnimo ah u dhawraa saacadaha shaqada;
 - d) Waa inuu caawiyaa ama uu beddelaa qof kasta oo jaallihiiisa mar kastoo ay lagama maarmaan noqoto;
 - .r) Waa inuu shaqada sii wadaa saacadaha shaqada ee caadiga ah ka bacdi haddii hawshu sidaa u baahnaato;
 - s) Haddii uu shaqada ka maqnaado waa itiuu cudurdaar soo diraa 24 saac gudahood;

- sh) Waa inuu ka hawl qabtaa meeshii hadba qofka madaxda u ah uu u diro.

Qodobka 44aad

Waxyabaha ka reebban:

Qofka shaqaalaha ah waxaa ka reebban:

- a) Inuu ku kaco wax alia wixii shaki gelin kara hufnaantiisa iyo daacadnimada uu u hayo qaranka;
- b) Inuu soo saaro ayadoo qoraal ah ama uu ku kallifo cid kale inay soo saarto wax alia wixii khusaynaaya shaqada Dawladda Hoose ee Muqdisho amase hadal caan ah ka sheego siyaasada. Dawladda amase arrimaha khusaynaaya nabadsugidda waddanka, haddii laga reebo waxyaabaha caadiga ah oo shaqadiisa rasmiga ah la xiriira amase uu u haysto oggolaanshaha Duqa magaalada.
- t) Inuusan aqbalin, iyadoo aysan ku jirin marka laga hadlayo jamicyaadka samafalka ka shaqeeyaa ama asbaab bani-aadumnuno, in uu qaato ama oggolaado ama wax ka baxsho xaal qaaramasho ah ama uu laf ahaantiisa uga qaybgalo uruurinta laga loogu tala galay ulajeeddo gaar ah, wax kastaba ha ahaatee, haddaan marka hore Duqa magaaladu fasax sidaas u siin.
- j) Inuusan oggolaan qaadashada hadiyad qjima leh amase shahaado marag-kac ah, haddaan Duqa magaalada ama Ku-xigeennadhsu u fasaxin.
- x) Inuusan gelin wax fellisaad ah ama maalgelin ay suurawdo inay Dawladda Hoose ee Muqdisho u soo jiiddo magac-xumo oo ciriiri gelisa amase isaga qudhisa culays ku saarta fulinta waajibaadkiisa rasraiga ah.
- kh) Inuusan lacag amaahan amase isgelin deyn maaliyadeed oo aad u ba'in oo uu ku yeesho qof, ama shirkad ama banki, kuwaasoo laga yaabo inay shaqooyin ra&mi ah ay isaga iya iyaga dhex marto. Inuusan u habayn noloshiisa si keeni karta inuu deyn-qaadasho amase mucsurnimo joogta all ku jiro.
- d) Inuusan ka qaadan jijo dibedda ah, qaab kasta ama sabab kasta arrintu ha yeelato, wax abaalgud ah oo ku saabsan shaqo ama hawl uu u qabtay inta uu xilkaas gudanaayo.
- s) Inuusan meeshooda ka bixin warqad amase dokumerli kaloo rasmi ah, haddaan horay loo siin oggolaansho cad.
- sh) Inuusan dulsaarin ama isku deyin inuu dulsaaro, isagoo ka faa-dey&anaya amase sarkaal kale wax ku yeelaya, awood siyaasadeed ama mid nooc kale ah - awooddaasoo uu kor dhigayo cid kaloo ka sarreysa, kuna dul saarayo xaal ku tacalluqa hawshiisa, ama hawsha qof kaloo shaqaale ah, hadba siday arrintu tahay.

- 1) Imiusan isku mashquulin inta saacadaha shaqada ah lagu jiro wax hawl ah oo aan lug ku lahayn shaqada rasmiga ah, amase inuusan ugu isticmaalin hawsha shaqaalaha Dawladda Hoose ee Muqdisho dano gaar ahaaneed.
- a) Inuusan ka tegin meesha uu ka shaqeeynaayo isagoon haysan og-golaanshaha qofka ka sarreya.
- n) Inuusan ka raadsan wax gacan-qabasho ah dad dibedda ah.

Godobka 45aad

Iibsashada iyo gadidda Guryaha

. Shaqaalaha waxaa qaban doona qodobbada sharciga lambarkiisu ahay 50 ee 10.8.1972, kuna saabsanaa iibsashada iyo yeelashada hanida ma guurtada ah.

QAYBTA V

HABSAMIDA (Dishibiliinka)

Godobka 46aad

Kartida iyo- habsamlda:

- . Qofka shaqaalaha ah waxaa lagu qaadayaa ciqaabta ku xusan qodobka (47) ee Xeerkaan, hadduu [a yimaado kartidarro, asluub xumo iyo kharribaad.]
- . Qofka shaqaalaha ah waxaa la xisaabayaa inuu yahay mid kartidaran.
 - a) haddii laga soo qoro xogwarran liita laba sanoo isku xigta, amase ka badanba;
 - b) hadduu yahay, siday la tahay cidda arxintu khusayso mid kartidaran amase kartidiisii ay baaba'day, rajana aan laga qabin inuu soo ceshado kartidiisii, iyadoo ay waxyaabahaas ugu wacaan tahay cudur kaga dhacay jirka ama maskaxda.
- Qofka shaqaalaha ahi wuxuu noqonayaa mid asluubtiisu xun tahay:
 - a) Hadduu ku xadgudbo qodobbada asluubta amase akhlaaqda ee laga rabo shaqaaluhu inay ku dhaqmaan.
 - b) Hadduu jabiyo habsamida (Dishibiliinka) amase awaariirta ay ay soo saarto Dawladda Dhexe, Duqa magaalada amase qofkamadaxdiisa.
 - t) Hadduu la yimaado dambi keenaya foolxumo akhlaaqeed.

Qdobka 47aad

Dembiyada iyo ciqaabtooda:

Tallaabooyinka habسامیدا (Dishibiliinka) **ah** oo qofka shaqaalaha ah lagu qaadi karo waa kuwaan soo socda:

- a) Canaan qoraal ah;
- b) Ganaax aan ka badnayn mushaarka toddoba maalmood;
- t) Mushaar joojin aan muddadiisu ka badnayn soddon **beri**; muddadaasoo aan lagu xisaabin doonin waqtiga hawlgabka **ama** liiltirka, hadba sida arrintu ay tahay;
- j) Shaqada iyo mushaarkaba in laga joojiyo muddo aan **ka** badnayn saddex (3) bilood, muddadaasoo aan lagu tirin doonin waqtiga hawlgabka **ama** liiltirka, hadba sida arrintu tahay;
- x) Dib in looga dhigo dallacaadda amase kororsiimada;
- kh) Mushaarkiisa in hoos loo dhigo qadder aan ka badnayn saddex (5) meelood meel, muddo aan **ka** badnayn lix bilood;
- d) Darajadiisa in hoos loo dhigo;
- r) Si khasab ah in loo geliyo hawlgabnimo;
- s) Shaqada in laga saaro isagoo xaqiisii la siinayo;
- sh) Shaqada in laga saaro xaq la'aan.

Ciqaabta ku cad xarafka (a) ilaa (t) ee hadalka aannu kor ku soo dhaafnay waxaa lagu qaadi karaa, hadba iyadoo ku xiran inta dembigu le'eg yahay, qofkii la yimaada:

- a) Dayacaad fool xun **ee xagga** shaqada amase hawlqabasho aan wanaagsanayn;
- b) Amar diiddo bareer ah;
- t) Fulin la'an waxyaabaha ku yaal qodobbada 43 iyo 44 (Eeg waajibaadka iyo mamnuucaadka);
- j) Fal keeni kara hbr-istaagid ama qasid shaqada xafiiska;
- x) Indha ka qarsi xadgudub ay ku kacaan shaqaalaha ka hoo-seeya;

Ciqaabta ku xusan xarfaha (j) ilaa (sh) ee weedha koowaad ee kor ku qoran waxaa lagu qaadi karaa, iyadoo hadba ku xiran inta dembigu le'eg yahay qofkii la yimaada:

- a) Si xun oo loogu isticmaalo awooodda;
- b) Ku xadgudub waajibaadka rasmiga ah oo dhaawac halis ah u geysan kara Dawladda, Dawladda Hoose ee Muqdisho, Hey'ad

kale oo caan ah ama dad caadi ah intaba:

- t) Sj xun inuu ugu isticmaalo ama u xado lacagta qofku hayo araase isaga lagu aamminey;
- j) In qofku weydiisto ama uu oggolaado wax abaahnarin ah inta uu fulinayo shaqadiisa rasmiga ah;
- x) Inuu la yimaado kala dambayn la'aan ba'an;
- kh) Inuu faafiyo waxyaabo ah sir cuius;
- d) Inuu ugu isticmaalo jagadiisa rasmiga ah si uu u gaadho dar shaqsi ah.

Qodobka 48aad

Ku qaadidda tallaabooyinka habsamida ah:

Qofka shaqaalaha ah looguma qaadi karo tallaabooyin habsami ah ama dishibiliin ah si khilaafsan Xeerkaan.

Iyadoon meel looga dhacayn wixii dacwooyin ah ama ha ahaadeen kuwa madaniga ah ama kuwa ciqaabta ee laga yaabo in horey loogu qaaday, qofka shaqaalaha ah oo fulin waaya ama ku xadgudba qoddbada Xeerkaan ku qoran, waxaa wax looga qaban doonaa sida soo socota:

- a) Isla markiiba isagoon guddi la hor keenin sida uu qabo qodobka 51;
- b) In la hor keeno Guddiga Dishibiliinka Waaxda;
- t) In la hor keeno Guddiga Dishibiliinka Dhexe.

Qodobka 49aad

Guddiga Dishibiliinka ee Waaxda:

Guddi dishibiliinka u qaabbilsan Waax kasta ayaa la asaasi karaa si 'uu u gak> dembiyada ku xusan Weedha labaad ee qodobka 47.

Guddigaasi wuxuu ka koobnaan doonaa saddex (3) Xubnoood oo uu ku jiro Guddoomiye uu magacaabi doono Ku-xigeenkii Duqa magaalada ee qaybta iyada ah.

Guddigaasi wuxuu awood u leeyahay inuu qaado dembiyada ay ku kacaan shaqaaluhu oo aan ahayn kuwa la hor keenayo Guddiga Dishibiliinka ee Dhexe, wuxuuna fulin karaa ciqaabta ku tilmaaman xarafka (a) ilaa (t). ee weedha koowaad ee qodobka 47.

Qodobka 50aad

Guddiga Dishibiliinka ee Dhexe:

1. Duqa magaaladu wuxuu asaasi doonaa isuguna yeeri doonaa Guddi Dishibiliin oo Dhexe si uu shaqaalaha ugu qaado dembiyada ku tilmaaman weedha saddexaad ee qodobka 47.
2. Guddigaasi wuxuu ka koobnaan doonaa xubnaha soo socda oo uu ku ijro qof Guddoomiye u ah oo uu magacaabo Duqa magaaladu: Afarta Ku-xigeen ee Duqa magaalada, Guddmiyaha Guddiga Shaqaalaha Dawladda Boose ee Muqdisho; iyo Agaasimaha "Waaxda Shaqaalaha.
3. Guddigaasi wuxuu awood u leeyahay inuu shaqaalaha ku qaado ciqaabta ku xusan weedha koowaad ee qodobka 47. Go'aanka Guddiga waxaa muddo 30 casho gudahood ah racfaan looga qaadan karaa Duqa magaalada isuguna wuu oggolaan karaa, ama waa beddeli karaa amase wuu baabi'in karaa go'aankaas isaga ah.
4. Guddigaasi wuxuu isla markaa geli karaa racfaanka looga soo qaa-to ciqaabta uu go'aamiyo Guddiga Dishibiliinka ee Waaxdu.

Qodobka 51aad

Ciqaaba isla markiiba ah (Summary Power):

1. Duqa magaaladu wuxuu awood u leeyahay inuu isla markiiba wax wax ka qabto isagoon Guddi hor keenin dembiyada ku xusan qodobka 47. Wuxuuna dadka gala ku qaadi karaa ciqaabta soo socota:
 - a) Canaan qoraal ah;
 - b) Ganaax aan ka badnayn 7 maahnood mushaarkood;
2. Shaqaalaha derejadoodu tahay «A» laguma qaadi karo ciqaabta noocas ah.

Qodobka 52aad

Shaqa ka joojin:

1. Haddh Duqa magaalada ama ku-xigeennadiisu ay gartaan in danta guud ahaaneed ay u baahan tahay in qof shaqaale ah - oo dembi ka galay xeerkaan amase xukun ciqaabeed tallaabooyinkiisa looga qaaday fal xeerkaani dembi ka dhigayo - xilka Xafiiskiisa uu deg-deg gacmaha ugala. baxo, wuxuu Duqa ama Ku-xigeenkii qofkaas ilaa markiiba ka joojin karaan shaqada Hase yeeshii, saraakiisha ka sarreysa Madax hawleed shaqada lagama joojin karo haddaan marka hore la helin oggolaanshaha qoran ee Madaxweynahha GSK,
2. Amarka shaqada - ka - joojintu wuxuu fari karaa in qofka shaqaalaha ah mushaarka qaarkhs ama gebi ahaantiisba laga joojiyo ilaa iyo inta la ogaanayo go'aanka Guddiga ama Maxkamadda.

- >. Muddada qofka shaqaalaha ahi xiran yahay isagoo sugaya xukun Maxkamadeed wuxuu xaq u leeyahay in la siiyo xaaskiisa masniuf xaa oo aan ka badnayn 1/5 (saddex-meelood meel) oo mushaarkii-sa bil walba.

Guddiga liabsamida - Dishib. - isna waa imm baaba'shaa amarkii shaqada - ka joojinta haddii qofka dembi ku caddaan waayo, haddiise JU ku caddaado waa inuu amarkaas xoojiya.

Qodobka 53aad

Habka dacwaqaadidda:

1. Codsashada ku saabsan in qofka la hor keeno Guddiga Dishtbiliinka waa inay iyadoo qoran ugu gudbisaa Guddiga Dishibiliinka ee Waaxda ama kan Dhexe, Waaxda arrintu khusayso muddo bil ah gudaheed.
2. Qofka eedaysanaha ah waa in Guddigu iyadoo u sii marsiinaya laantiisa, qoraal ku ogeysiinaysaa taariikhda xukunka lagu qaadayo, waana inay siisaa nuqul ah dacwada loo haysto ugu yaraan **48** saac ka hor. Dacwadaasna waa inay ku jiraan waxyaabo xaqaa'iq ah oo ra'yii ku filan qofka ka siin kara waxa lagu soo eedayneayo waxay. yihin. Guddigu way beddeli karaan, waxna waa ku dari karaan eeddaynta waqtii kastoo ka horreeya intaan go'aankiisa la gaarin. Hase yeeshi, haddii eedayntaas la beddelay ama la siyaadshay no-qoto. siday Guddiga la tahay, mid haddii xukunka isla waqtigii la galoo dhaawacaysa qofka eedaysanaha ah, Guddigu markaas wuxuu awoodi karaa inuu dib u dhigo dacwadaas qaadiddeeda ilaa iyo waqtigii ay lagama maarmaan la noqoto.
3. Guddga Dishibiliinka ee Waaxda ama kan Dhexe waa inay qaadaan wax alia wixii caddayn ah oo eedaynta taageer'aya, kaddibna waa may qaadaan wixii caddayn ah oo uu keeno qofka dacwada loo fcayslo. Eedeysanuhu. wuxuu xaq u leeyahay inuu goob-joog ahaado marka caddaynta la qaadayo iyo inuu isaga qudhisu caddayn bax-sho. Caddayntaas qaadiddeedu waxay ahaan kartaa mid af ah ama mid qoraal ah, hadba siday Guddiga la nqoto. Qofka dacwada loo hays to wuxuu xaq u leeyahay inuu iska hor keeno markhaatiyasha dacwada taageeraya oo uu su'aalo qoran hor dhigo qof kastoo markhaati ah oo niarag furkiisa qoraal looga qaaday.
